



Waa maxay Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound)?

collegebound.wa.gov
collegebound@wsac.wa.gov
888.535.0747 (doorashada 1)



Ardayda dugsiga dhexe: Ma dooneysaa inaad dadka caawiso adigoo ah xirfadle caafimaad? Miyaa dooneysaa inaad wax wanaagsan dhisto? Miyaa dooneysaa inaad sameyso geemam muuqaal ah? Miyaa dooneysaa inaad bilaawdo ganacsi kuu gaar ah? Wax kasta oo riyadaadu tahay, Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) waxa uu kaa caawin karaa inaad gaarto halkaas! Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) waa ballanqaad hore oo ah kaalmada maaliyadeed ee gobolka, sida Deeqda Waxbarashada Kulleejka ee Washington (Washington College Grant), oo loogu talagalay ardayda dakhligoodu u qalmo. Waxay caawinaad ka geysataa bixinta kharashka dhexdhexaadka ah ee waxbarashada (heerka kulleejka dadweynaha), khidmadaha, iyo qadar yar oo loogu talagalay in lagu iibsado buugaag in ka badan 60 kulleejyo, jaamacado, iyo dugsiyo farsamo oo ku yaalla gudaha Washington! Ma tahay Ardey Isku-diyaarinaya Dhigashada Kulleejka (College Bound)?

Yaa u qalma?

Toos ayaa ugu diiwaan-gashmi doontaa haddii:

- Aad dhigato dugsi dadweynaha, aad dhaqaale ahaan ugu qalmi kart (eeg shaxda hoose), oo aadna waxaana iska qortay helida FRPL (free and reduced-price lunch, qado bilaash ah oona qiimo jaban) fasalka 7-aad ama 8-aad, ama si cusub aad ugu qalanto fasalka 9-aad, **ama**
- Aad ku jirto daryeelka ilmaha ee dawlada, ama aad tahay qof dawladu biisho, dhigtana inta u dhexaysa fasalka 7-aad iyo qalin jabinta dugsiga sare.

Haddii aad u qalanto FRPL, iska diiwaangeli dugsigaaga. Waxaad si toos ah laguugu diiwaangelin doonaa qori doonaa Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound). Weydii la-taliyahaaga maanta!

2025-26 tilmaamaha dakhliga

Tirada Qoyska	Dakhliga Sannadlaha ah ¹	Dakhliga Billaha ah	Dakhliga Asbuuclaha ah
2	\$39,128	\$3,261	\$753
3	\$49,303	\$4,109	\$949
4	\$59,478	\$4,957	\$1,144
5	\$69,653	\$5,805	\$1,340
6	\$79,828	\$6,653	\$1,536
Xubno dheeraad ah ²	Ku dar \$10,175	Ku dar \$848	Ku dar \$196

¹ Dakhliga qoyska waa inuu ka yaraado ama u dhigmaa cadadkaan.

² Xubin kasta oo dheeraad ah oo kamid ah qoyska, kudar cadadka lacagta qofkii.

Habab kale ee loogu qalmo:

La xiriir xafiiskeena si aad u codsato haddii:

- Aad ka dhigato dugsi si gaar ah loo leeyahay ama barnaamij waxbarasho guriga lagu bixiyo gudaha WA oo aadna la kulanto xadka dakhliga, **ama**
- Aad ku jirto nooc kale oo daryeel caruur ah oona dakhli ahaan aad ugu qalanto FRPL.

Sida loo sii ahaado mid u sii qalma:

Shuruudaha barnaamijka:

- Ka qalin jebiso dugsiga sare oo ku yaalo WA, dugsi guriga wax lagu barto, ama ka hel GED (General Educational Development, Heer Horumarsanaanta Guud ee Tacliinta) gudaha WA.
- Kasbo ugu yaraan 2.0 GPA (Grade Point Average, Celceliska Dhibcaha Imtixaanka) haddii aad si toos ah ugu gudbeyso kulleej afar sano ah kadib dugsiga sare (looma baahna wax GPA haddii aad dhigato kulleejka bulshada ama ka farsamada).
- Waa inaad gelin wax danbi ah.
- Isdiwaangeli kulleej ama dugsi xirfadeed u qalma oo ku yaal gudaha WA (waxaa jira in ka badan 60!) gudaha hal sano kadib qalinjebinta dugsiga sare, isla markaana ku sii jir buuxinta shuruudaha.

Fiiro gaar ah: Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) waxaa la isticmaali karaa ilaa lix sano kadib markaad kulleej iska-diiwaangeliso ama ilaa aad ka hesho shahaadada jaamacadda ee koowaad, midba midka soo horeeya.

Sidee ayaan ku ogaanayaa inaan ahay ardayda ka qeyb ah Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) ?

Waxaad ku heli doontaa wargelino boostada ama iimayl ahaan. Haddii aad beddesho lambarkaaga telefoonka ama ciwaankaada boostada, la xiriir xafiiskeena si aadan u seegin wax wargelin ah.

Sidee ayaan ku heli doonaa lacagaha/deeqaha?

- Xareysa codsiga kaalmada maaliyadeed sanadkaaga ugu dambeeya ee dugsiga sare (iyo sannad kasta oo aad dhiganeyso kulleejka).
- Buuxi shuruudaha dakhliga iyo deganaanshaha gobolka.
- Isdiwaangeli dugsi sare ama kulleej xirfadeed ku yaala gudaha WA ah oo sii ahaaw arday heer wanaagsan ku jira. Waxaa jira ku dhowaad 60 machadyo/kulleejyo ka qayb qaadanaya!

Barnaamijka Isku-diyaarinta Ardeyga ee Dhigashada Kulleejka (College Bound) waa barnaamij ay maamulaan Golaha Guul-gaaritaanka Ardayda ee Washington (Washington Student Achievement Council).



WASHINGTON STUDENT ACHIEVEMENT COUNCIL
EDUCATION • OPPORTUNITY • RESULTS